



## Taageeridda Go'aan Qaadashada

**Fahamka xulashooyinka, iyo go'aan gaarista naftaada taageerada aad u baahan tahay.**

### Waa Maxay Taageerada Go'aan Qaadashada (SDM)?

SDM waa beddelka mas'uul qof u noqoshada. Waxay u oggolaaneysaa dadka naafada ah inay doortaan shaqsiyaadka iyaga ku dhow si ay uga caawiyaan inay ururiyaan oo ay fahmaan macluumaadka, go'aanno gaaraan, iyo inay kuwa kale u gudbiyaan go'aannadaas. Waxay xaqiijineysaa qofka inuu xaq u leeyahay inuu gaaro go'aannadiisa nololeed ee muhiimka ah iyo in la ixtiraamo go'aannadiisa iyadoo la kaashanayo dadka ay doortaan.

### Sidee Uga Shaqeysaa Gobolka Washington?

Sannadkii 2020, gobolkeennu wuxuu soo saaray sharci dejinaya Go'aan-qaadashada La Taageeray iyadoo lagu beddelayo mas'uul qof u noqoshada. Sharcigu wuxuu dadka da'da ah ee naafada ah xaq usiinayaa inay la galaan Heshiis Taageero Go'aan-qaadasho ah oo ay la galaan qof kale oo qaangaar ah oo ay doortaan \* kaasoo qofka siin doona taageerada ay iyagu doonayaan.




Sharcigu ma dhaqan galayo illaa Janaayo 2022, laakiin qof kastaa wuu abuuri karaa heshiis Taageerada Go'aan-qaadasho hadda.

### Muxuu ka kooban yahay heshiisku?

- ⚙️ Magacyada qaangaarka la taageeri doono iyo qofka (dadka) iyaga taageeri doona. \* Dadka qaangaarka ah ee naafada ah iyo taageerayaashooda waa inay ku saxiixaan heshiiska hortiiisa laba markhaati iyo / ama nootaayo dadweyne.
- ⚙️ Nooca go'aanada uu qaangaarka doonayo in laga caawiyo, oo ay ku jiraan go'aannada ku saabsan halka ay ku nool yihiin, meesha ay ka shaqeeyaan, sida ay waqtigooda u qaataan, ama sida ay u maareeyaan daryeelka caafimaadkooda iyo dhaqaalahooda.
- ⚙️ Nooca caawinta ee qaan-gaarka uu doonayo marka uu go'aan qaadanayo, oo ay ku jirto caawinta ururinta macluumaadka, fahanka xulashooyinka, ama inay sheegaan waxay doorbidaayaan.
- ⚙️ (Ikhtiyaari) Awood go'aan gaarid xaddidan taageerayaashooda iyaga oo adeegsanaya beddel kale oo mas'uuliyad ah marka lagu daro heshiis go'aan qaadasho taageero ah, oo ay ku jiraan Awoodda Qareenka ee daryeelka caafimaadka iyo / ama go'aannada maaliyadeed, iyo sidoo kale Wakiilka maareeynta faaidooyinka badbaadada bulshada (Social Security Benefits).

\*Si aad u noqotid taageere, dadka la soo xulay waa inaysan ku dhicin qeyb ku qoran [RCW 11.130.730](#).



### SI ISXIG XIGTA (TALAABO TALAABO)



Xulo taageerayaasha aad doonaysid inay kaa caawiyaan inaad go'aan gaarto.



Kulan si aad ugala hadasho noocyada go'aannada iyo kaa caawinta aad rabto iyo aad u baahan tahay.



Samee Heshiis qeexaya sida aad tahay waa laguu taageeri doono. Hubso inaad saxiixdo sii deynta macluumaadka haddii aad rabto taageerayaashaada (taageerayaashaada) inay la xiriiraan dadka kale iyagoo oo kuu hadlaya adiga.




Saxiix Heshiiska SDM. Heshiiska waa in aad ku saxiixdaan labadiinaba markhaati iyo / ama nootaayo dadweyne hortooda adiga iyo taageerahaagaba. Heshiiska waa la beddeli karaa ama la dhammayn karaa adiga ama taageerahaaga (yadaada) wakhti kasta.



Diyaar, La Diyaariyay, OGOW ...

## Taageeridda Go'aan Qaadashada

Heshiiska Taageerida ee Go'aan-qaadashada waa la beddeli karaa ama lagu dhammayn karaa qofka weyn ee naafada ah waqti kasta.



### MacluumaadDheeraad ah



National Resource Center ee Taageerada Go'aan Qaadashada:  
[supporteddecisionmaking.org](http://supporteddecisionmaking.org)

Northwest Justice Project: [nwjustice.org](http://nwjustice.org)

Washington Law Help: [WashingtonLawHelp.org](http://WashingtonLawHelp.org)